**UN-HABITAT**

**Barnaamijka Degsiimada Aadamaha ee Qarammada Midoobay**



12. Xildhibaanka G/degaanka oo ah Hoggaamiye

## Taxanaha Tababarka

**Komishanka Yurub**





### Xildhibaanka G/degaanka oo ah

# Hoggaamiye

## Tilmaame-bare 12

Tababarka Hoggaanka la Doortay

Xarunta
QMee
Degsiimada
Aadanaha
(Habitat)

# Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

## Tilmaame-baraha 12aad

## Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Tarjumaaddii: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka (APD)

Istanbul, 1996kii - "Shir Madaxeedkii Caasimadaha"

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod,
Naqshadaha iyo jaan-goynta na Vicki Gillette

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

HS/718/04SO

# HORDHAC

Sida lagu muujiyey natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya madaxda (Xildhibaannada) la soo doortay ee Dawladda Hoose, ama se siyaasiyiinta gudaha, waxa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dawladda Hoose iyo maamulkeeda.

Sannadihii yaraa ee ugu danbeeyey, tiro dalalka la duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paruguay ayaa ku tallaabsaday markii ugu horreysay muddo tobanaan sano ah, meelaha qaarna weligood markii ugu horraysay, hawsha doorashada Xildhibaannadooda Golaha Degaanka iyo Duqaydooda magaalooyinka. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HABITAT) waxay hore u dhigtay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xildhibaannada Golaha Degaanka in ay ka wakiilo noqdaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaan ba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay sharxayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, is-gaadhsiin, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee Xildhibaanka Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Tilmaame-barahan, Xildhibaanka Golaha Degaanku markuu yahay Mas'uul Maaliyadeed, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, waxaana loogu talog-alay bilow ahaan in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka waddaniga ah ee Dawladda Hoose ama se unugyada/waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dawladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Degsiimada Aadanuhu (HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama lammaane/wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yidhaa "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doorto ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

Waxaan filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax-qabad ee Dawladaha Hoose, dhinaca unkidda dhaqammada hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996kii Shirweynihii Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha, Habitat II.

Waxaan u mahad-naqayaa Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W. Tees kaalintii ay ka

qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Degsiimada Aadanaha (HAABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xaruntaa QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow
Kaaliyaha Xoghayaha-Guud
Xarunta Qaramada Midoobay ee
Degsiimada Aadanaha (Habitat

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

# AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-du, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda iyo habaynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxa ka hawl-galay koox tarjumadda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiga Nabadda iyo Horumarka, Jaamicadda Hargeysa iyo Jaamicadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxa mudan Akaademiga Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

Xagga koofiyadda Koofiyadda uu xidhan yahay qofka geesta midigta xigaa oo lagu muujiyey bogag soo socda waxa loo soo qaatay inay astaan u noqdaan kaalinta xildhibaanka deegaanka ee lagu bandhigay buuggan tilmaame baraha ah taloyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha

Koofiyad maamuuseed oo ay xidhaan xoolo-raacatada buuraleyda Yurubta Bari.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

# Halka uu kaga jiro tilmaame-barahan


Bogga

Sida loo isticmaalayo buuggan 1

Qaybta 1aad

Qormo la xidhiidha xildhibaanka deegaanku markuu yahay Hoggaamiye 3
Qeexid 4
Soo-ururin 4
Milicsi 4
Aragtiyaha xiisaha leh ee la wadaago 5
Hoggaamintu waxay ku lug leedahay maamulidda doorar dhowr ah 5
Milicsi 7
Aragtiyaha xiisaha leh ee la wadaago 8
Ka-hor-degid, muddada dheer 9
Ka-wakiil-noqosho 10
Karti-gelinta dad kale 11
Igmasho/wakiilasho: suurto-gelinteeda hay'adda gudaheeda 12
Hirgelinta Fikradaha 12
Xalliibnaan iyo xisaabin 13
Barbaarinta hoggaaminta danbe 13
Milicsi 13
Qodobbo muhiim ah 15
Raad-raac 16

Qaybta 2aad

Aqoon-is-weydaarsi ku lug leh xildhibaanka deegaanku markuu yahay Hoggaamiye 17
Muuqaal guud 19
12.1 Laylidiyaargarow ah: Maxay qabtaan hoggaamiyayaashu 22
12.2 Diraasad Xaaladeed: dhacdo akhlaaqeed 24
12.3 Bandhigga tababaraha 26
12.4 Suurtageliyaha: Waxqabadka hoggaamnta la soo doortay 27
12.5 La Tashi iyo gudbinta xirfadaha 32

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

# SIDA LOO ISTICMAALAYO TILMAAME-BARAHAN

Tilmaame-barahan Tababarka ee XILDHIBAANKA GOLAHA DEGAANKU MARKUU YAHAY MAS'UUL MAALIYADEED, sida Tilmaame-barayaashan kale ee taxanahan, waxa loo isticmaali karaa siyaalo badan.

## Diraasad kuu gaar ah

Qormada Tilmaame-barahani ku bilaabmayo waxa loogu talo-galay in aad iskaa wax ugu baratid. Waxa keliya ee aad u baahan tahay waa meel deggan oo aad ku fekertid, waqti iyo warqado aad wax ku qortid. Si aad u hesho natiijooyinka ugu fiican, waxaanu kugu dhiirri-gelinaynaa in aad qorto jawaabaha su'aalaha ka dhasha qormada. Qiimaha barashada ee akhristaha tubtan raaca ayaa laban-laabanta.

## Tababarka aqoon-is-weydaarsiga:

Qoraallada Tababaraha iyo agabka layliga ee Tilmaame-barayaasha waxa loogu talo-galay in ay adeegsadaan tababarayaasha waayo-aragga ahi marka ay wadaan aqoon-is-weydaarsiyada tababarrada ee Xildhibaannada Dawlado Hoose oo kala duwan. Agabka casharada iyo layliyada tababaraha ee buugan loogu talo galay in ay isticmaalaan tabarayaasha waay-araga ah ee aqoon isweydaarsigan tababarka ah ee xildhibaanada dawladda hoose ee kala gedisan. Waxa ku jira qaabab waxbarasho oo kala duwan iyo habab tabarayaashu u suura gelin kara inay waafajiyaan aqoon isweydaarsiga duruufaha u gaarka ah xildhibaanada.

Ujeedooyinka buugan loo qoray waxa ay kugu dhiirigalinayaan in aad ku biiriso waayo-aragnimadaada tababarenimo si aad sare ugu qaado agabyada tababarka ee xildhibaanada dawladda hoose.

Tababarow waxa aad dooran kartaa in aad sidiisa u raacdo agabka buugan taxanaha ah uu u yaalo. Haddiise aad ka door bido waad kala hormarsan kartaa ama waxbaad ka bedeli kartaa haddii loo baahdo si loo gaadho ujeedooyinka iyo xaaladaha u gaarka ah tababar kasta.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

Waxa aad dooran kartaa tababar saddex saacadood ah adiga oo isticmaalaya layliyada buugan. Ama waxa aad ka faa'iideysan kartaa agabyada badan ee buugan adiga oo ku biirsanaya waayo aragnimadaada si aad uga dhigato tababar maalin dhan socda.

Buuganiwaxa uu ka mid yahay 12 buug oo taxane ah oo lagu tababaro hogaamiyayaasha la soo doortay. Waxa aad dooran kartaa ama lagaa codsan karaa in aad qabato aqoon isweydaarsi kaaga baahan in aad isticmaasho dhawr buug ama dhammaantood oo mudo dheer soconaya. Walow buug kasta loo isticmaali karo gaar ahaantii, hadana waxtarkooda iyo ka faa'iideysigooda waxa uu ka badan yahay marka taxanaha oo dhan ay qaataan xildhibaanada dawladda hoose.

## Tababar-kooxeedka:

Marka la helo tababare xirfad iyo waayo-aragnimo leh, agabyada waxa kale oo loo isticmaalayaa si ay u kordhiyaan wax-qabadka (performance) xildhibaanada meelka wada shaqeeya marka la tababaryo. Xildhibaanada meelka wada shaqeeya, waxa la rumeysan yahay tababaruhu in uu hawlaha tababarada ee buugan uu soo diyaariyo una habeeyo in uu ku daro wax dheeraad ah isaga oo tixgalinaya duruufaha iyo sifooyinka kooxda la tababarayo. Waxa la rajeynayaa xaaladaha noocan ah in loo arko buugan in uu yahay agab adeeg (toolkit) oo ay ku jiraan habab tababar oo kala duwan oo la isku badhxi karo, la iswaafajin karo, wax lagu dari karo lagana saari karo hadba sida haboon.

Waxa aad haysataa fursad aad ku kala dooranayso noocyada tababarada buugan. Waxa lagu rajo weyn yahay in aad sida ugu fiican uga faa'iideysato.

# Qaybta 1aad

# Qormada

## Xildhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Qormo

## Qeexid

Xildhibaanka Degaanku, marka uu ku jiro kaalinta ah HOGAAMIYAHA wuxu ku talaabsadaa dhamaan doorarka uu amro si ay ugu suurtogasho inuu ugu hello is beddello wacan oo wax ku oolah nolosha codbixiyayaasha iyo bulshadaba.

## Soo-ururin

Waxaanu calaamadinaynaa/astaamo u yeelaynaa doorarkaaga marka aad tahay madax dawladda hoose ah oo la soo doortay. Iyadoo aanu rumaysanahay dhammmaan doorarkii hore ee kow iyo tobanka ahaa marka la isu keeno, haddii si dadaal iyo nidar leh aad uga soo baxdo, ay taasi kaa dhigayso hoggaamiye bulsho, haddana hoggaamintu intaas kuma eka.

Waxaanu kuu soo qaban doonaa siyaalaha qaar xirfadahan shakhsi iyo khibradahaba, kolka la isu geeyo, ay kuu akidi karaan halka aad ka taagan tahay/kaga jirto liiska magacyada huwan sharafta bulshada, kuwaasoo ah kuwa dhab ahaan wax u qabta.

## Milicsi

Markaan iska dhigo hoggaamiye, waxa maskaxdayda kusoo dhacaa waa sidan hoos ku muujisan:-

1. ______________________________
   ______________________________
   ______________________________
2. ______________________________
   ______________________________
   ______________________________
3. ______________________________
   ______________________________
   ______________________________

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

Qormo

# Aragtiyaha xiisaha leh ee la wadaago

John Gardner ayaa ina xasuusinaya,"hoggaamintu waxa nadiif ah maaha". Tusaale, go'aamada waa la gaadhaa, dib ayaana loo eegaa ama cuyub ayaa loo celiyaa. Is afgaranwaayadu had iyo goor way dhacaan, nidaam la'aantuna waa waxaan la gefeyn. Hadafkaad gadhaa hadafka xiga ayuun buu kaaga dhigayaa mid sidii hore ka degdeg badan loo qabanayo; xal kasta gudihiisa waxa ku jira iniinyo ay leeyihiin mushkilado cusub. Sida Donald Michael inoo sheegayna, xilliyada inta badan ammuuraha badankoodu gacmaha kuuguma jiraan. Ma jiro hoggaamiye ka hela/mabsuuda xaqiiqada, haddana hoggaamiye walba wuu og yahay. Hoggaamiyuhu waa aragti-bixiye iyo qof wax-qabadkiisa ku masila qiyam la ugu sarreeya ee mujtamaca.

Wax la yaqaan ma u egtahay? Way u eg tahay. Kaalinta hoggaamiyaha bulshadau aad ayey uga dhib badan tahay "hoggaamiyaha" calamka ganacsiga iyo wershadaha. Niibta (u quturka) iyo hubanti la'aanta ku jira markaad noqoto madax la soo doortay maanta iyo cahdigan (waqigan) aynu ku jirno, waa is-beddelka laxaadka leh ee ka dhacaya heerarka bulshada gebi ahaanteed –min duleedkaaga ilaa bulshada adduunweynaha. Mar-marka qaarkood waxbaba kulama aha haddii isbeddelka kuu muuqadaa uu daaradaada ka dhacayo amase meel ah badhtamaha adduunka.Saamaynta uu ku yeeshaa daryeelka bulshadiina wuxu noqon karaa mid si isleeg u degdeg badan halisna ku noqda xilliyada fog ee inagu soo fool leh.

## Hoggaamintu waxay ku lug leedahay maamulidda doorar dhowr ah

Markii aanu ku dhaqaaqnay murtidan tababarka, waxa si is dabajoog ah naloo xasuusiyey in heerka guusha ee laga gaadhi doono hirgelinta mid kasta oo ka mid ah doorarkan ay ugu xidhan tahay si ama siyaalo kale in allaale inta kale oo dhan. Ama, haddii aynu si kale u dhigno, wixii kasta ee aad isku taxalujiso qabashadoodaba arrimo kale ayey hoosta iskaga xidhan yihiin/tiirsan yihiin. Fahmada ah in wax waliba xidhiidh la leeyihiin wax kale waxa laga yaabaa inay tahay ka mid xirfadaha aynaan weli ka hadal ee haddana dhibaatada ku haya hoggaaminta bulshada. Hadda aynu eegno inaynu soo qaban karno tusaaloyin yar oo ah sida loola kulmo hoos iskaga noolaantasi.

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

1. Haddii aad go'aansato in aad dad kale caawisid maxaa loo baahan yahay inaad ku kacdo bulshada dhexdeeda, adigoo aan dedaalkaas lacag/maalay dawladda hoose leedahay ku kharashgaraynayn (masalan, iyadoo aad u suurtogelisid waalidka aan ubadkooda la noolayn ee saboolka ah, in loo dhiso guryo ay galaan oo aan dakhli weyn kallifin, waxa iyana laga yaabaa inaad u xidhato dhowr koofiyadood oo (tuur iyo tirbiicoba isu yeeshid) si ammuurtaasi ay u hirgasho. Tusaale:
   - Waxaad curisaa siyaasad goleed oo khusaysa maalka gaar ahaaneed iyo tallaabooyinka ugu horeeya ee aad qaadi lahayd;
   - Isticmaalawooddii aad "xidhiidhka" ku samayn lahayd si aad u ogaato in hay'adihii ku habboonaa ay niyad ka tahay taakulaynta ashkhaastan soona hel aqoonta iyo farsamooyinka ku habboon iyo weliba qalab qiimihiisu

hooseeyo;

Ka qayb qaado heshiis ku lug leh heerar waxaqabad ee caqligalka ah, kaasoo dhexmaridoona kuwa dhismaha qaabilsan iyo jaararkooda.

2. Ama waxaad dooni kartaa inaad soo kordhiso cashuuraha berriga ee laga qaado hantida, adigoo u hawlgelaya dib-u-qiimayna ku samaynaya hantidii hore u diiwaan gashanayd iyo adigoo kusoo siyaadinaya dhisme cusub liiska cashuuraha hantida (kolkaasoo aad la soo baxayso kaalintaadii amah-bixiyaha (Financier). Si aad u meelmarisid hadafkan waxaad u baahan kartaa:
   - Inaad suurtogeliso kulamo bulsho, kuwaasoo aad garan karto in la iskaga hor imán doono ujeedada goluhu uu ka leeyahay ku dhaqaaqidda barnaamijka noocaas ah;
   - Inaad isticmaasho kartidaada war deeqsiinimo oo aad ka dhaadhiciso bulshada baahida loo qabo barnaamijkaas oo kale iyo cawaaqibka ka iman kara waaga dambe, haddii goluhu aanu qaadin tallaabada lagama maarmaanka ah; iyo
   - Inaad gaadhid go'aammo adag oo khuseeya cashuuraha hantida ee noocyada kala duwan ee dhismayaasha ah.
3. Adigoo kormeeraya dhammaystir nadaafadeed oo la xidhiidha hawlgal hor leh oo godad buuxin ah, waxaad ogaatay inay jirto khatar kasoo fool leh wasakh/khashin ka imanaya wershadaha magaalada ta ugu weyn. Waxaad goosatay xalka guusha leh ee dhibaatadan khuseeyaa inuu u baahan doono arrimahan:
   - Dhaqangelinta siyaasad ka caqligalsan tii hore oo loo dejiyo qubidda/daadinta noocyada kala geddisan ee khashinka adag;
   - Kulamo aad la yeelato kabiiro dhowr ah iyo hoggaamiyayaasha wershadaha si aad si wacan ugu fahamto natiijooyinka ka iman kara gelitaanka mushkiladdan murugsan (kaalintaada xidhiidhiyaha ah); iyo
   - Kala-xaajoodka Wasaaradda Ilaalinta Deegaanka inay ku gaalaa bixiyaan/la dul joogaan kormeerid khashinada khatartu ka iman karto ee lagu shubayo goobaha khashin-qubka.

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

Mushkiladda noocan ahi waxay u baahan kartaa in go'aamo laga gaadho kharashka ku bixidoona meelaynta khashinkaas. Waxa laga yaabaa inaad doontid inaad u fiiro yeelatid qandaraas aad siisid waaxda gaar si ay ugu suurowdo inay mushkiladdan wax uga qabtaan. Haddii ay suurtogal noqon weydo in loo helo xalwadajir ah arinkan, waxaad u dhowdahay inaad dan moodo inaad ka qaaddo dadka leh wershadda tallaabo ciqaab leh (isticmaalka awooddaada sandullaynta/dadmuquuninta).

Sidaad adba arki karto, kaalinta hoggaamintu waxay bilked u noqon doontaa kartidaada aad ku keenayso oo aad kusoo qaadanayso xirfadihii iyo dhaqanadii aynu kaga soo faalloonay murtiyihii tababarka. Arrinku maaha wax keliya oo aad halmar qabanayso amase kaalin qudha oo aad gelayso. Waxa weeye karti aad ku fikirayso oo aad si qaabaysan wax uga qabanayso niibo kala jaad ah oo xaddi badan ee ku soo bulqanaya golayaasha deegaanka casrigan ee sida xawliga leh isu beddelaya. Maaha inaad qaabab keliya ka fekertid. Xubnaha golaha deegaanku, hoggaamiyayaal ahaan, waa inay ku

shaqayn karaan shuruudahan iyagana.
Maxaanu uga dan leenahay erayadan, "ku shaqaynta shuruudaha qaababka?" iyadoo ay adag tahay in lagu sharxo erayo kooban, waxa weeye samaynta go'aamada iyo ku dhaqankooda iyadoo si buuxda loo aqoonsanayo aragtiyaha iyo xaqiiqada xidhiidhada wada jiree mar-marka la yeesho, hoos-iskaga xidhnaanta falalkeena, iyo dheellitirka awoodda leh ee qaababka murugsan/murgan. Amase, markaynu si ka sii sahlan u dhigno (aqoonsadka inaynaan si wacan u fahmayn waxa loo la jeedo weedha dambe inkastoo aynu sheegnay!), tallaabo kasta oo go'luhu uu qaado waxa ka horimanaya caabbiyo, kuwaasoo intooda badani ay soo baxaan ujeeddo la'aan iyo lama filaan. Taas micnaheedu wuxu yahay waa inaad ka fikirto meelo ka durugsan xuduudaha falalkaaga, si aad u male awaasho/u saadaaliso waxa soo bixi doona ee ka dambayn doona tallaabooyinka aad qaadday, una diyaargaroobi lahayd inaad tallaabo kale qaaddo. Qaabab ku shaqayntu, iyadoo ka dhigan dhinac aan ka go'i karin hoggaaminta, waxa weeye adigoo si guuli ku jirto u kora mowjad aad adiga laftaadu kicisay/dhalisay. Waxaanu rumaysanahay inay arrintaasi la mid tahay wixii uu marxuumkii, Karl Wallenda, hindisaayihii weynaa ee qof sameeya waayirka gigtiran ee aerial-ka ugu horreeyey, uga jeeday markii uu lahaa, "kolkaad xadhiga gigtiran saran tahay waad nooshahay; wixii kale oo dhami waa ha ku sugaan".

## Milicsi

Soo xasuuso waqtiaad qabatay door hoggaamin ah adigoo xubin ka ah golaha deegaanka waxaanad qoraal ka dhigtaa waxaan fidsanayn oo ah dhinacyada muhiimka ah ee dhacdada. Ka fekir doorarka kala geddisan ee aynu ka wada hadalnay ee ku lug leh murtiyaha tababarka. Kaalintee ayaad jishay/matishay markii aad qaadatay guud ahaan doorka hoggaaminta ee xaaladda aad soo xasuusatay? Haddii aad fursad u heli lahayd inaad xaaladdaas dib ugu noolaato arrimahee ayaad wax ka beddeli lahayd? Maxay yihiin taloyinkaaga hoggaaminta ee ugu waaweyni? Sidee ayaad u malaynaysaa inaad u kordhin lahayd kartidaada la xidhiidha hoggaaminta, adigoo haysta dhaqanada/dabeecadaha kala duwan ee ku lingaxan hoggaaminta doorashada ku timid? Ma jiraan dhaqamo/dabeecado kale oo aad ku waddo inay muhiim yihiin, haseyeeshee, aan lagu soo darin murtiyahan? Haddii ay sidaas tahay, maxay yihiin?

# Aragtiyaha xiisaha leh ee la wadaago

Tilmaame-baahan "Xildhibaanka Degaanku marka uu yahay Tub-dejiye" waxa aanu ka sheekaynay ahmiyadda ay leedahay hadaf-yeelashadu iyo qorshaha mudada-dheer, laakiin xoogga ma aanu saarin in ku filan.

Hadaf-yeelashadu, haddii lagu sameeyo xaaladda immika taagan ee runta ah oo keliya wax dhan ma noqonayso. Xaaladda, adigoo ka dhigan hoggaamiye bulsho, aad ku curiso go'aanadaada, si xawli leh ayey isu bedeshaa, taasoo fikradaada ah waqtiga ka gaadh-gaadhsiiay inta badan lafteedu noqoto natiijo la hubo oo dib u dhac leh.

Waxa loo baahan yahay waa karti lagu fakiro shuruudaha waxa dadka qaar ay ugu yeedhaan indheer-garasho wadajir. Bal aynu daymo intaas ka dhow u yeelano masuu'liyaddan. Aragtida fog waxay tahay kartida lagaga fakiro mustaqbalka xagga waxyaalaha loo baahan yahay in la qabto hadda si loo la jaanqaado si guul leh waxaynu is leenahay waqtiyada soo socda ayaa la iman doona. Hoggaamiyaha la soo doortay ee dawladda hoose, waxay u tahay awood dhisme oo uu qorshe mustaqbalka la xidhiidha habab run ah ugu dejiyo, si uu u gaadho go'aamo is daba-jog ah oo dhagxan sees u noqda mushkilad-xalilka bulshada hab waa dambe la beddeli karo, ama laga guuri karo haddii loo baahdo,si uu u daboolo baahiyaha iyo niibaha runta ah ee soo boodi doona.

Si loogu qaato qof ilhaansan/loo qiro inuu meel fog wax ka arki karo, indheer-garashadaasi waa inay ku dhaqaajiso/ku kiciso xasuuso aad u wacan bulshada, si dhidibada loogu taago guulo heerar sare ah oo ay bulshadu leedahay. Indheer-garashadu waxay keentaa hagitaan iyo jihayn ku socda mushtaqbal aan la hubin hasayeeshee akidan, maxaa yeelay, bulshada ayaa diyaarisay shaqo-hoosaadkii si ay u qaabisho/wajahdo mustaqbalku marka uu soo dhigto.

Aragtiyahaas fog waxa laga helaa/ kuu soo jiida haybad iyo xoog marka cidi kula qaybsato iyo weliba kolkay si tartiib ah ugu soo unkamaan dad wax wadaaga.

Waxa jirta maah-maah gabowday/qadiim ah oo dulucdeedu tahay hoggaamiyuhu dadka ka dambeeya/daba-socodka u ah ayuu kartidooda yeeshaa. Hoggaamintu waxay u baahataa inay lahaato dad raaca oo ku dayda, xubinta halista ah ee indheer-garashadu ay yeelataa waa danta. James Mac Gregor, oo noloshiisa xirfadeed/shaqo ku qaatay diraasadda hoggaaminta, wuxu akiday ahmiyadda uu leeyahay xidhiidhka dhammaystiran ee u dhexeeya hoggaamiyayaasha iyo dadka la socda/raacsan.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

> Waxaan ku tilmaamaa hoggaaminta, hoggaamiyayaasha oo ku sasaba dadka raacsan in ay u hawlgalaan hadafyo cayiman kuwaasoo ka dhigan waxyaabo qiimo leh iyo dhiirigelino-doonista iyo baahiyaha-xiisaha weyn iyo filitaanada ay yeeshaan hoggaamiyayaasha iyo dadka la socda intuba.

Sida uu sheegay Burns, maskaxda weyn ee hoggaamintu waxay fadhidaa habka marba ay hoggaamiyayaashu waxay u arkaan oo ay wax u qabtaan, haddii ay tahay nafahooda ama kuwa raacsani qiimaha ay leeyihiin iyo waxyaalaha dhiirigeliya.

Meel fog wax ka araggu waa awood aad ku arkayso qiimaha aad adigu joogto iyo dhiirigelinaha khuseeya dadka ku raacsan. Hoggaaminta ilhaamaysan/hibada leh

Qormo

waa kartiaad ku gaadhi/hanan karto qiimayow gaas iyo dhiirigelinadaas sigeesinimo leh iyo ra'yiaaan ka noqonsho lahayn.

> Siaad dadka u hoggaamisid, ka dambee.
>
> -La Tzu

## Ka-hor-degid, mudada dheer

Hoggaamintu waxay ka kooban tahay qorshaha muddada dheer iyo hawlaha mudadda kooban ee la waafajinayo qorshayaashaas muddada dheer. Qorshaha lacagta la geliyo hantida iyo socodsiinta hawsha waxay qayb ahaan ku salaysan yihiin baahiyaha muuqda ee ay leeyihiin kuwa ku nool mustaqbalka iyo ogolaanshahooda inay culayska maalgelinaha aad ku dhaqaaqdo adigoo ka wakiilah, ay kaala qaybgalaan waqtigan aynu ku jirno. Siyaalo badan ayey arrimahaasi u yihiin falalaaminaad. Haseyeshee, waxa muhiim u ah hoggaamiyayaasha la soo doortay in fakirkooda iyo waxqabadkoodu ay noqdaan kuwo muddada-dheer ku lug leh go'aamadooduna ay ahaadaan qaar ka hor degid leh. Soo cusboonaynta/dib u eegidda go'aamadu inta badan waa lagama maarmaan si loo "suubiyo" wax aan sidii hagaagsanayd loo qaban markii hore, amase sidii loo isticmaalayey duugoobay/googo'ay, ama u baahan in fiiro loo yeesho sabab ama tu kale darteed. Go'aamada ka hor degidda loogu talogalay waxa weeye kuwa xalila dhibaatooyinku intaanay dhicin, ama dayactira alaabooyinka intaanay tuuris noqon oo aan qaar kale lagu beddelin (iyagoon waqtigii laga beddeli lahaa gaadhin).

Arrimahaasi waxaad moodda inay yihiin hawlo maala yacni ah oo aan u qalmin in laga dhigo qayb ka mid ah hoggaamintа, ha ahaatee, hoggaamintu waa awood ay leeyihiin dadka caadiga ah oo ay ku qabtaan arrimo aan caadi ahayn. Bulshooyinka inta badan, kartida xildhibaanada deegaanku ay ku fikiraan kuna qabtaan go'aan dejintooda ku lug leh muddada-dheer iyo ka hor deggida, inta badan waxay yihiin falal qayral caadi ah/caadiga ka baxsan oo geesinimo iyo hoggaamin leh. Mushkiladaha maalin walba dhaca waxay awood u leeyihiin inay budliyaan xataa ku talagallada ugu wanaagsan ee noolayaasha (aadamaha), kuwaasoo ay ku jiraan qaar loo soo doorto xafiiska dawladda hoose.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

> Haddii aan cidi seebayn, doontu way caaryeysaa.
>
> -Maahmaah reer Mangolia ah.

# Ka-wakiil-noqosho

Ka wakiil noqoshada codbixiyayaashaada iyo beeshu waa udub dhexaadka xilalka hoggaaminta la soo doorto ee dawladda hoose. Waxa kale oo ay noqon karaan kuwa ugu adag marka la garab dhigo ama lala miisaamo mas'uuliyadahaaga kale. Weligaa ma yara joogsatay oo ma ka fekertay cidda aad golaha deegaanka uga wakiil tahay? Ma waxaad ka wakiil tahay bulshada baayacmushtarka ah? Ma masjid Jaamaca? Ma halka aad magaalada ka deggan tahay? Ma dan yar oo kooban oo aad ku qabto hantiilayaasha dhulka ee bulshada?
Ma kuwa dhaqaale ahaan faa'iido laawayaasha ah? Waa kuwee? Mararka qaarkood xildhibaanada deegaanka waxa dhaqaale ahaan tiiriya ashkhaas dhowr ah, kuwaas oo fisha danahooda in loo ilaaliyo. Waxa jira xildhibaano golaha lagaga badan yahay, kuwaas oo la moodo inay u joogaan golaha si ay danahooda tirsan ugu ilaashadaan oo keliya, taasoo micnaheedu yahay in ay kaga faaiidaystaan xafiiska dano gaarHoggaaminta Golaha Degaanka ee Dawladda Hoose waa inay had iyo goor maskaxda ku haysaa baahiyaha khuseeya bulshoweynta, arrintaas oo afka laga sheego ficilna aan lagu darin. Ugu horreynta, mushkiladda meesha taallaa waxay tahay sharaxa kooban ee, "bulshoweynta waxa u roon". Siyaalo badan ayaa bulshada waxa u fiican ay tahay waxaan dhab ahayn ee ku xidhiidhsan wax la rumaysan yahay oo aanay wax ba ka jirin.

Badiba danaha kala gaarka ah waxay ku sheegaan/tilmaamaan waxyaalo kala gedisan. Habka aad ku tijaabin karto in waxa aad qabanaysaa uu yahay wax wada gaadhi kara bulshada/beesha waxa weeye adigoo istaaga wax yar oo is weydiiya su'aalaha soo socda. Kuwamaa ka faa'iidaysan doona tallaabadan? Faaii'dadaasi ma tahay mid ku istaahil ah ama lagaga gam'ayo kharashka dawladda ee ku baxa? Ma jiraan dad/qofaf ay waxyeello ka soo gaadhi doonto tallaabadan? Haddii aad taagan tahay meelo xariiqaha ka baxsan, adigoo waddani caadi ah oo daawanaya go'aankan oo goluhu uu ku camal falayo, maxay shucuurtaadu ahaan lahayd? Ma waxaad u arki lahayd maalgelin beesha dhammaanteed wada gaadha, mise arrin lagu naaxinayo/taageerayo koox yar oo beesha ka tirsan, dano gooni ahna wadata? Hoggaamintu waxay u baahataa hubsiimo/baadhis noocaas ah, haddii la doonayo inay ka samata baxdo waqtiga adag.

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Taxanaha Agabka Tababarka

Waa ta labaade, sidee ayaad u matilaysaa waaxaha beesha ee aanad aqoon fidsan u lahayn, sabab kasta ha lahaatee? Waxaad kasoo qaaddaa inay yihiin qolo/qabiil laga tiro badan yahay oo ka tirsan waaya-aragnimadaada nolosha? Ama ase kuwa naafada ah? Ama xubno ka tirsan dhedig-laboodka (masalan, haweenka)? Ama ase kuwa sida gaarka ah u nool? Xarfadaha hoggaaminta suuban waxa ka mid ah in la dhexgalo bulshooyinkaas/beelahaas tirada yar ee ku dhex jira beelweynta.
Waxa taana ka siiwacan, in laga fikiro habab goluhu siduu u dhan yahay u dhexgeli karo beelahaas yar-yar. Haddii aan sidaas la yeelin, waxaad noqonaysaa nin kelidii dagaal buureed oo xaga sare laga xigo ku jira, markaad doonayso baahiyahooda inaad ka wakiil noqoto. Dadka golaha kula jogaana waxay kuu arki karaan qof degmadii laga soo doortay mid kale dhaafsaday/ku beddeshay.
Waa ta saddexaade, waxa iman kara fursado aad kaga wakiil noqoto beeshaada waxyaabo

ka qiimo sarreeya arrimihii caadiga ahaa. Dawladaha hoose qaar ka mid ah ayaa dhex dabbaasha xuubab musuq-maasuq iyo falal khariban, kuwaas oo ay u ekaato inaanay sinaba u dhici karin in laga furdaamiyo arrimahaas. Wax talo ah oo aanu amuuraha noocaas ah kaaga haynaa ma jirto. Waa arrimo aanu qirayno inay adag yihiin, waxaanay u muudsan karaan awoodda iyo itaalka beesha si wax kasta ka dhakhso badan. Waxa laga yaabaa talada ugu wacan ee aanu ku siin karnaa inay tahay adigoo minguuriya/dejiya dhaqanka aad rumaysan tahay inuu u dhigmo hoggaaminta lagu kalsoon yahay. Adigoo door-unke (a role model) u noqda qayrkaa ayaad difaac wanaagsan ka samaysan kartaa ku faafidda falalka xun-xun xildhibaanada kula midka ah dhexdooda.

Sida kale ee aad uga gaashaaman kartaa dhaqanka noocan ah golaha dhexdiisa waxa weeye adigoo samaysta koox isku xidhan (shebekad) oo aydin isku fikrado tihiin, kuwaasoo diyaar u ah inay istaagaan golaha dhexdiisa lana tiriyo markay caddaato codadkooda isku duubani inay farqi samayn karaan. Waxa loo maleeyaa cadow gaaga ugu daran, markay xaalado noocaas ah kula soo dersaan, inuu noqdo dareenkaaga oo ku yidhaa cid waliba arinkaas way ku kacaysaa ( waxba lagama qaban karo), sidaas awgeedna, aad isaga aqbasho jawrka fikradaas hagitaan ahaan.

Fikradaas maskaxdaada ka saar. Waxa jira ogaal soo kobcaaya in musuqu uu burburinayo xoogga iyo awoodda beesha, sidaas darteedna ay habboon tahay in wax laga qabto, maaha akhlaaq qabiil ahaan ( inkastoo taasi ay eedda ugu roon tahay) ee ay sababtu tahay hawsha oo aanay u fiicnayn, taakulaynta adeegyada bulsho ee loo baahan yahay oo aanay u wacnayn, horumarinta beelweynta ee muddada dheer oo aanay u roonayn. Ka wakiilnoqoshada waqtiba ka ka dabmeeyaa siicaatoobaysa ee wax siinaysa /haaxinaysa danaha gaarka ah ee wax ay kasoo gelayaan (siyaabo kala duwan oo keliya), waxay la mid tahay korriimada cudurka saradaanka ee ay adag tahay sida xididada loogu saaro inta badan bulshooyinka, kaasoo mar-marka qaarkood lagu furdaamiyo qalliinka loola jeedo in lagu tiritiro sababta cudurka dhalisay ee lagaga dhaqmo oo keliya sanduuqa codbixinta marka la duljoogo. Hoggaamintu waa aaminaad muqaddas ah, inaad ka wakiil noqoto dadka beeshaada dhammaantood na waa qayb aan ka go'i karin aaminaadaas.

## Karti-gelinta dad kale

X/dhibaanka Degaanku markuu yahay Hoggaamiye

Ta loogu faham ka yar yahay baaxadda hoggaamintu waa waxa dadka qaar ay ugu yeedhaan hoggaaminta nafiaanay ku jirin, taasoo ah mid gaadhaysa dad kale oo aan danaynayn faaiido shakhsi. Laba dhinac oo hoggaaminta noocan ah oo lagaga soo sheekeeyey buugagga talabixinta ee kale (Xildhibaanka deegaanku marka uu yahay talabixiye siyaasadeed iyo xildhibaanka deegaanku marka uu yahay suurtageliye) ayaa muhiim ah in lagu soo qaado wadahadalkan. Talobixiyayaasha siyaasaddu waxay ugu roon yihiin markay dad kale ka raaridayaan awoodda ay xaq u leeyihiin inay ku camalfalaan, sidiioo ay iska leeyihiin.

Taxanaha Agabka Tababarka

Dadka haya waramase awood khabiir, tusaale ahaan, waxay ku shaqaynayaan hoggaamin nooc gaar ah markay u dhaafayaan/uga tegayaan awoodahaasi dad kale, si aan nafi ku jirin. Marka suurtageliyuhu uu u siixaadho waddada si ay dadka kale isaga gooyaan xadhkaha ku tiirsashada, haddii ay tahay saboolnimo, jaahilnimo, dhaqamada/dabeecadaha khayaalka ku dhisan ee lunsan ( stereo type),

ama inkiraadda/diidmada adeegyada aadamaha ee aasaasiga ah, qofkaasi dhedig iyo lab kuu doono ha ahaadee wuxu beesha u soo kordhinayaa tayada ugu sarraysa ee hoggaan uu yeelan karo. Hoggaamiyaha la soo doorto ee u suurtogeliya ama awood u siiya dad kale oo beesha ku jira siiuu doorkii hore ka muhiimsan u ciyaaro waa hoggaamiye dhab ah.

## Igmasho/wakiilasho: suurto-gelinteeda hay'adda gudaheeda

Dhaqamada maamulka dawladaha hoose ee mar-mar iyo dhif la arkaa adduunyada dhammaanteed waxay yihiin igmashada xilka. Sidaas ay tahayna, igmashadu waa tallaabada ugu weyn ee ay qaadaan maareeyayaashu si ay xil gudasho wacan u helaan, waxaanaynu ku dari karnaa, si hore loogu dhigo tacabka aadamaha ee hay'adda. Inta badan maamulayaashu cid uma wakiishaan hawlahooda badh iyagoo ku dooda dadka ka hoos shaqeeyaa karti uma laha ay ku qabtaan mas'uuliyad dheeraad ah. Dhinaca kale haddii aynu ka eegno, shaqaale hoosaadku ma qaban karaan sababtoo ah weligood fursad looma siin ay ku gutaan xil-kooda dheer.
Waxaad odhan kartaa igmadku waa arrin uu iska leeyahay maamulku oo aan munasib ku ahayn tababarka xildhibaanada. Jawaabtu waa haa iyo maya labadaba. Waxaanu qabnaa golayaasha qaar ayaan igmanin awood ku filan shaqaalahooda. Micnuhu marka uu sidan yahay, igmadku toos ayuu ugu habboon yahay siiuu goluhu mawduucaas uga faaiidaysan karo. Dawladaha hoose intooda badanina waxay u gudan karaan adeegyo badan si kasii wacan sidii hore, haddii ay wax suubban u arkaan gelidda awoodda waxqabad ee shaqaalahooda, min heerka sarkaalka madaxa fulinta ilaa nadiifisada. Iyadoo ay tahay masuuliyad maamule, haddana goluhu wuu dhiirigelin karaa dhaqanka noocaas ah heer kasta oo hay'adda munishiibiyada ha joogee.

## Hirgelinta Fikradaha

Malaha u quturka ugu weyn ee horyaalla hoggaamiyaasha wuxu yahay inuu helo waxqabad ku lug leh arrimaha la sheegay inay u baahan yihiin in la qabto si ay beeshu hore ugu marto. Dhammaystirka indheer-garashadu weligeed wax sahlan maaha, dhif iyo nadir ayaana si dhakhso leh loogu gaadhi karaa.

Waxa ugu weyn ee ay hoggaamiyayaal badani barteen waxa weeye ogaanshaha inaanay habboonayn inay yeeshaan maal ay ku tasarufaan amse ay hirgeliyaan barnaamij ay ku hubinayaan inay hantiyaan muwaadiniinta beeshu. Hogaamiyayaal badan oo dihin/guulaystayaal ah ayaa isku khalda/kala garan waaya kantarool iyo awood. Waxay had iyo goor isha ka laliyaan silsilad balaadhan oo khayraad dihin ah, kuwaasoo la yaalla bulshooyinkooda.

Khayraadka kale ee badiba aanay wax weyn ka isticmaalin beelo badani waa hay'adda dawladda hoose lafteeda. Sadded istiraatijiyadood ayaa kor u qaadi kara firfircoonida shaqaalaha si ay uga caawiyaan hoggaamiyayaasha dawladda hoose fulinta/oofinta indheer-garashadooda.
Waxay yihiin:

**Qormo**

1. Saraakiisha muhiimka ah in lagu soo daro waqtiga hore qorshaynta hawlaha khatartu ku jirto ee hubsiimada u baahan.
2. In loo diyaariyo arrimihii lagama maarmaanka ahaa ee lagu fulin lahaa hawlahaas, kuwaasoo ay ku jiraan suldadda, mas'uuliyadda iyo ogolaanshaha ay ku qaban lahaayeen.
3. In si joogto ah loogu babac dhigo xaaladda hadba taagan, digtoonidaada inaad ka hesho akidaad iyo tamarta waxqabad ee hay'adda oo dhabarkeeda isku qarisa kolka isbeddelada si cad loogu baahan yahay, si loo la tallaabsado baahiyaha beesha iyo dalabyadooda.

## Xalliibnaan iyo xisaabin

Waxaynu mar dhoweyd ka sheekaynaynay ahmiyada indheer-garashadu ay u leedahay hoggaamiinta. Xaliibnaantu waa furfurnaata waqtiyada go'aan samaynta, ogolaanta in war qaybsi laga yeesho tallaabooyinka golaha, iyo siyaasadda albaabka furan ee khusaysa qorshaynta iyo maamulka barnaamijyada iyo adeegyada dawladda hoose. Xaliibnaantu muhiim ayey u tahay hogaamiyeyaasha la soo doorto iyo kuwa la magacaabo labadaba iyo habka ay ku shaqeeyaan ee la xidhiidha codbixiyayaashooda. Xaliibnaata waxa soo raacda xisaabinta weyn. Waxyaalahaas samaanta leh ee ku lug leh hoggaamiinta dadweynaha waxay isu yihiin sawir muraayadeed iyo qofka/shayga muraayadda horyaala. Waxaad ku dhaqantaa mid ahaan isla markaasoo ka kalena uu ku iman doono qayb qiimihiisii hore ka mid ah iyo faa'iido labanlaabatay taasoo aad hantidaan adiga iyo beesha aad ka wakiilka tahay. Xalliibnaanta iyo xisaabtanka waxa lagu hantiya kalsoonida dadka.

## Barbaarinta hoggaaminta danbe

Ugu dambayntii, hoggaamiyaha indher-garaka ah wuxu koriyaa/barbaariyaa horumarka hoggaamiyahayaasha cusub. Hoggaaminta beeshu waxay noqon kartaa amase ay tahay inay noqoto mid guri-ku-barbaarto ah. Laakiin, waxay ku noqotaa tallaabo kas iyo maan ay u qaadaan kuwa iminka haya talada hoggaaminta beesha iyo mas'uuliyadda. Waxaanu rabnaa inaanu ku gunaanadno taxanahan ah fursadaha barashada hoggaaminta inaanu ku weydiisano inad xasuusato dadaaladaada khuseeya korinta jiilka/da'da tan xigta ee hoggaamiyayaasha u noqon doonta beeshiina.

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

## Milicse

Ma magacaabi kartaa qaar ka mid ah da'da idinku xigta ee aad rumaysan tahay inay u adeegi doonaan beeshiina? Maxaad adigu, qof ahaan, qabanaysaa si aad u taageerto kooxdaas cusub ee tababaran ee hoggaamiyayaasha ah (new cadre) Miyey kusoo daraan dumar? Ma kuwa dhaqaalaha ahaan aan wax faa'iidin? Ma qolooyinka laga tirade badan yahay? Ma dar kale oo ah kuwa mar-mar iyo dhif hela fursad ay wax kaga darsadaan baahiyaha hoggaaminta ee beeshiina.

# Qormo

____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________
____________________________________________

A qoonso/soo qabo laba ama saddex qof oo beeshiina ku jira oo aad is leedahay waxay ka joogaan hoggaamin ta da'da soo socota waxaanad ku nidargashaa inaad ku soo darto inay si toos ah uga qayb qaataan xukunka beesha. Ku tax magacyadooda hoos waxaanad caddaysaa waxa kuu qorshaysan inaad ku dhaqaaqdo si ay ugu soo darsamaan/uga qayb qaataan:

| Hoggaamiyayaasha mustaqbalka | Tallaabooyinka qorshaysan |
|---|---|
| 1.____________________ | 1.____________________ |
| 2.____________________ | 2.____________________ |
| 3____________________ | 3.____________________ |

> "Meel Aar ka kacay, Atoor fadhiisay."
>
> Maah-maah Soomaaliyeed

X/dhibaanka
Degaanku
markuu yahay
Hoggaamiye

Taxanaha
Agabka
Tababarka

## QODOBBO MUHIIM AH

Hoggaaintu maaha shaqo-nadiif ah. Mar-mar dhif ah ayey arrimuhu sidii loo qorsheeyey u dhacaan.

Dhaqanka Shiinaha ee isbeddelka la xidhiidha waxay u yaqaaniin,"fursad halis ah", waa tilmaan ku habboon (sax ah) niibta ku hortaal ee kuugu adag.

Hoggaamintu waxay ka dhigan tahay kolkaad gashato dhammaan koofiyadaha lagu soo qaaday/lagaga soo sheekeeyey taxanahan ku lug leh dhacdooyin barasho iyo waxyaabo kale.

Hoggaamintu waxay ugu roon tahay markad u gashato marba midh koofiyad ah wax ka badan.

Mar haddii wax walba ay ku xidhiidhsan yihiin wax kale, hoggaamiyuhu waa inuu dayaa mushkiladda taagan ee xalka loo hayo waxa ka dambeeya siuu u arko/helo mushkiladda dambe ee uu abuurayo.

Hoggaamintu waxay u baahan tahay indheer-garasho, adigoo ku dhalinaya dadka kale inay abuuraan indheer-garashooyinkaas kuna shaqo/xiisa gelinaya sidii ay aragtiyahaas fog uga dhigi lahaayeen dhab.

